



## Darawalada Amazon waxa ay u kacayaan in ay u adeegaan oo ay qaadaan qoysaska PPS

Iyada oo uu dhamaaday sanad-dugsiyeedkii 2019-20 oo uu isu bedelay xagaa, Dugsiyada Dadweynaha Portland waxa ay wadayaan qaybinta cuntada si ay gacan uga geystaan quudinta qoysaskeena. Qoysaska aan awoodin in ay tagaan 14 ka goobood ee cuntada dugsiyada, Amazon ayaa u kacday.

Amazon, oo kaashanaysa Sanduuqa PPS, ayaa waxa ay siisay gaadhsiin cuntooyin iyo agabka waxbarashada ah qoysaska iyo ardayda caafimaad ahaan nugul kuwaas oo ay dhibaatooyin ka haystaan helitaanka gaadiidka guud ahaan magaalada Portland.

Cuntooyinkan iyo agabkani waxa ay ahaayeen kuwo diyaar u ah qoysaska PPS si ay uga qaataan goobaha dugsiya laga bilaabo xidhitaanka xarumaha dugsiyada bisha Maarso illaa iyo xagaaga. Qoysaska aan awoodin in ay tagaan goobaha – sida kuwa leh dhibaatooyinka socodka ee jidheed, baahiyaha gaarka ah, caqabadaha dhaqaale iyo nidaamyada difaaca ee daciifka ah – darawalada Amazon ayaa si toos ah ugu geynaya agabkaas iyaga.

Maadaama aynu u gudubnay xagaagii, Amazon waxa ay doontay in ay ugu dhamayso sanad-dugsiyeedka “khasnad” ardaydayada. Treasure Truck ga Amazon waxa ay ardayda siisay shandadaha dhabarka oo ay ka buuxaan agabka lagama maarmaanka ah ee dugsiya, oo uu ku jiro tabletka Amazon Fire. Sidoo kale waxa ay dadka waaweyn ee guryaha jooga siisay xidhmooyinka qoyska oo ay ku jiraan agabka guriga, cuntooyin fudud iyo agab kale.

“Waxa aanu aad uga mahad celinaynaa Amazon siinta adeeg aad loogu baahnaa qoysaskayaga,” waxa yidhi Jonathan Garcia, Madaxa kaqayb-qaadashada PPS ahna Madaxweynaha Sanduuqa PPS. “Waxa ay ahaayeen shuraakooyin bulsho oo wanaagsan kuwaas oo qabtay wixii laga filayey wax ka badan oo aan ahayn keliya siinta qoysaskeena waxyaabaha lagama maarmaanka ah balse sidoo kale ah kor u qaadidda macnawiyadkooga.”

Tan iyo bilawgii COVID-19, Amazon waxa ay kaashatay bangiyada cuntada iyo degmooyinka dugsiyada ee guud ahaan wadanka oo dhan si ay ugu tabarucaan adeegyada gaadhsiinta raashinka iyo cunooyinka hore loo sii cabeyey si loo bixiyo 6 milyan oo cunto ah iyada oo la adeegsanayo shabakaddeeda gaadiidka ee xooggan. Tabaruca adeegyada gaadhsiinta in ka badan 5,000 oo cunnooyin iyo “khasnado” ah qoysaska Dugsiyada Dadweynaha Portland, Treasure Truck ga Amazon sidoo kale waxa ay gacan ka geysatay gaadhsiinta PPE, laabtobyoy, alaabaha raashinka ah ee dalabka sare leh, xidhmooyinka daryeelka, iyo in ka badan 50,000 oo cunnooyin ah siddeed magaalo oo ku yaalla daafaha U.S.

Si aad ugu tabarucdo Sanduuqa Gargaarka Coronavirus, fadlan eeg [web-beejka barnaamijka](#). Ogow wax badan oo ku saabsan [Amazon Treasure Truck](#).